



## **Fiidiowyadan cusubi waxay u sheegayaan magangelyo doonyada warbixinno aasaasi ah oo ku saabsan qaab socodka nidaamka magangelyada**

Xafiiska laanta socdaalku wuxuu u sameeyey dadka magangelyo doonka ah fiidiyow ku saabsan qaab socodka nidaamka magangelyada marxaladaha kala duduwan.

Fiidiowyadani waxay u sharaxayaan magangelyo doonyada qaab socodka nidaamka magangelyada sida ugu fudud ee loo fahmi karo

### **Ka daawo/ fiirso fiidiowyada xafiiska laanta socdaalka marinka-Youtube ka**

Waxaad ka heleysaa fiidiowyadan soo socda xafiiska laanta socdaalka marinkooda Youtube ka:

- Magangelyo ka dalbashada Finland
- Sababo nooce ah ayaa sharciga lagu heli karaa?
- Qaab socodka nidaamka magangelyada yaa hawlahaa kala qabta?
- Wareysiga magangelyo doonka
- Sugitaanka go'aanka
- Go'aanka ogolaanshaha ah
- Go'aanka diidmada ah

Waxaad weydiin kartaa wixii warbixin dheeraad ah ee fiidiowga ku saabsan shaqaalaha ka shaqeeya xerada qaabilaada ama kaamka.

Fiidiowga sameyntisa waxaa qeyb ka ahaa mashruuca- ONE. Mashruucaas ujeedadiisu waa in la hubiyo, sidii ay magangelyo doonku uga heli lahaayeen warbixin wanaagsan qaab socodka nidaamka magangelyo doonkooda iyo sidoo kale xuquuqdooda iyo waajibaadkooda qaab socodka nidaamka. Mashruuca-ONE wuxuu ka heley kaalmada mashruuca magangelyada-, dal u soo guuridda-, iyo maalgelinta dal la qabsiga (AMIF).

Mashruuca waxaa dheer fiidiowyada oo la sameeyey sidoo kale warbixinta magangelyo doonyada- oo qoraal ah, kaas oo lagu sheegayo warbixinta aasaasiga ah ee dalbashada magangelyo doonka. Booliska ama mas'uuliyiinta xuduudaha ilaaliya ayaa adiga ku siinaya qoraalkan, marka aad dalbaneysid magangelyada. Wuxuu ka heley kaalmada mashruuca magangelyada-, dal u soo guuridda-, iyo maalgelinta dal la qabsiga (AMIF).

### **Macluumaadkan waxaa si wadajir ah loola sameeyey magangelyo doonyaasha**

Mashruucan waxaa la doonayey in macluumaadkiisa laga sameeyo sida suurtogalka ah kuwo ka yimidey macaamiisha. Sababtaas awgeed ayaa macluumaadkan loola sameeyey si wadajir ah magangelyo doonyaasha iyo shaqaalaha xarunta qaabilaada ee kaamka.



Fiidiowyada waxaa lagu turjumey luqadaha guud ahaaneed ee magangelyo doonyaasha sida: carabi, dari, ingiriisi, farsi, soomaali, sorani, turki iyo ruush. Qoraalkan waxaa lagu helayaa oo luqadahaa dheer sidoo kale albaani, isbaanish, kurmaanji, faransiis iyo iswiidhish.

**Fiirso/ daawo fiidiowyada:** [migri.fi/videot-turvapaikanhakijoille](https://migri.fi/videot-turvapaikanhakijoille)

**Daawo qoraalada:** [migri.fi/esitteet-ja-julkaisut#turvapaikka](https://migri.fi/esitteet-ja-julkaisut#turvapaikka)